



SUCCESSFUL SCHOOLS SURVEY



Su'aalaha inta badan la isweydiyo (Laga bilaabo 10-18-16)

Waa maxay sahanka xog-ururinta xaalada dhabta ah ee dugsiga?

Xaalada dhabta ah ee dugsigu waa tay'ada iyo sumcada dugsiga, tusaale ahaan in aad dareento in iskuulku leeyahay soo dhaweyn isla markaana goob nabad ah; iyadoo ay qoyskeenu, ardeydeenu iyo shaqaaluhaba dareenkoodu yahay in dugsigani yahay dugsigoodii. Sahanka xog-ururintu xaalada dhabta waa aalad macluumaad lagaga soo ururinayo muddo kooban shaqsiyaad fara badan.

Waa maxay sababta Sahanka Xog-ururinta Xaalada Dhabta ee Dugsiyada najaxay aan u qaadanayaan?

Sahanka Xog-ururinta Xaalada Dhabta ah ee Dugsiyada najaxay waa fursad ay Dugsiyada Dadweynaha Portland ay ku dhageysanayaan dhammaan qoysaska. Xog-ururinta Dugsiyada Najaxay waa fursad kale oo lagu helayo codadka kumanaan qoys hal mar, taasi oo siineysa natijjooyin aan wada wadaagi doono shaqaalaha dugsiga iyo bulshodaba.

Waa ayo cida sahanka xog-ururinta qaadaneyssaa?

Waxaa qaadanaya sahankani Waalidiinta/Wakiilada, Ardeyda fasalada 5^{aad}, 7^{aad} iyo 10^{aad} iyo dhammaan shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Portland Dugsiyada ka shaqeeya.

Waa maxay sababta aan u dooranay fasalada 5^{aad}, 7^{aad} iyo 10^{naad}?

Waxaan rabnaa in aan maqalno waayo-aragnimada ardeyda laga bilaabo Dugsiyada K-5, dugsiyada dhexe iyo dugsiyada sare. Fasalada 5^{aad}, 7^{aad} iyo 10^{aad} waxaan u dooranay in ballan-qaad u sameyno in aan maqalno ardeyda da'da bilowga waxbarashada, dhexe iyo kuwa sareba.

Sidee ayaan uga qeybqaataa sahanka, xaggeese ayaan ka helayaa sahanka xog-ururinta?

- Waalidiinta/Wakiilada: online ah www.pps.net; isaga oo xaashi ah waxaad ka heli xafiiska dugsiga; iyo isagoo ah foom PDF halkan www.pps.net (fadlan waxaad ogaataa in aad sahanka daabici doonta si aad u buuxiso foomka PDF ah). Sahanada online-ka, iyo sahanada PDF ka ah waxaa la heli karaa iyaga oo ku qoran dhammaan luqadaha la caawiyio. Bogga ugu horeeya ee sahanka online-ka waxaad ka dooran kartaa luqada aad jeceshahay ee aad doorbidayso. Fadlan waxaad dhammaan waraaqaha sahanka ku soo celisaa xafiiska iskuulkaaga ama April Arevalo, oo ah Qorsheynta Nidaamka iyo Waxqabadka, L2 BEC.
- Shaqaalaha iyo ardeyda sahanada waxay ka qaybqaadan doonaan inta lagu gudo jiray xilliga Jiilaalka

Xaggee ayuu ka yimid sahanku?

Sahanka Iskuulada Najaxay ee Dugsiyada Dadweynaha Portland wuxuu ka dhashay cilmi baaris ay shaqaalaha, Guiddida Golaha Iskuulada, iyo kooxo ka mid ah bulshada iyaga oo soo qaatay Sahamada Caruurta Caafimaadka Qabta ee California, kaasi oo sawir fiican ka bixin kara dadweynaha iyo baahida dugsiyada degmadeenu qabaan.

Waxaan ahay waalid ama wakiil. Sidee ayaan uga jawaabaa su'aalahani?

Sahanka Waalidka/Wakiilka, fadlan ka jawaab su'aalaha ku saleysan waayo-aragnimada aad u leedahay dugsiga. Haddii iskuulka ay kuu dhigtaan hal arday wax ka badan, fadlan waxaad buuxisaa sahanka iskuulada Dugsiyada Dadweynaha Portland ee arday kastaa waxa kaaga bartaan.

Waa maxay sababta ay su'aalaha dareenka hamada iyo jinsigu ay dhammaan uga mid yihiin sahanada ? Dhammaan ardeyda, qoysaska iyo shaqaalahaba waxaan rabnaa in ay dareemaan in la soo dhaweynayo,ay nabad yihiin inta ay joogaan iskuulka, sidaa awgeedna dugsiga lagu caawinayo iyagoo aqoon ahaan iyo bulsho ahaanba kobci doona.

Weydiinta jinsiga iyo su'aalaha hawadiisa waxaan ururineynaa macluumaaad ku saabsan waayo-aragnimadiina iyo in aad waliba dareentaan in la idin soo dhaweyyeyo, nabad tiihin caawimina la idin fidinayo. Ugu dambeyn, macluumaadkaasi waxaan u isticmaali doonaa sidii aan si wanaagsan idinka caawin lahayn sidii aan baahidiina wax uga qabano.

Waa maxay sababta ay Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) u rabaan in ay ogaadan da'deyda, jinsiga aan ahay, dookha hawadeyda, asalkeyga iyo meesha aan ka soo jeedo?

Waxaan weydiisanaa waalidiinta iyo wakiilada in ay na siiyan macluumaadkani ,sababtoo ah waxaan jecelnahay in aan dhegeysano waayo-aragnimadooda shaqsiyeed ee dugsiyadooda. Haddii waalid/wakiil uu rabo in uu wax nooga sheego waayo-aragnimadooda ama ta ardeygooda waan soo dhaweyneynaa in aad ka soo jawaabto idinkoo ku qoraya jawaabtiina su'aasha 60naad: Miyey jiraan wax kale oo aad jeceshahay in aad noo sheegto taasi oo ku saabsan dugsiga?

Maxaad ku sameyn doontaan jawaabaheyga?

Natijada sahanka waxaa lala wadaagi doonaa shaqaalahaba dugsiga iyo bulshada waxaana loogu talogalay in ay maamulka Dugsiyada, maamulayaasha dugsiyada iyo macalimiinta uu ka siiyo macluumaaad hufan oo aan saxar lahayn kuna saabsan waayo-aragnimada qoysaska dugsiyadeena.

Jawaabahaagu waa kuwo qarsoodi ah, sidoo kalena marnaba lagu xidhiidhin maayo macluumaadka cinwaanka aad degan tahay.

Sidee loo isticmaalay natijadii ka soo baxday sahankii hore?

Waxaa suurtagal ah in aad halkan ka eegi karto <http://www.pps.net/page/2519> natijjooyinkii laga bilaabo 2014-2015 sahanka online-ka. Jawaabaha waxaa loo isticmaali doonaa si baahiyaha gaarka ee iskuulka lagu tilmaamo iyo in lagu qiimeeyo baahidaas. Guddida Xuduudaha ee Dugsiyada Degmada waxay wargelin baahida dugsiyada dhexe ee dib-u-habeynta, iyada ay ka mid noqon doonaan Guddida Golaha Dugsiyada si ay u isticmaalaan. Waxaa la aasaasay qorshaha "Mobile First" oo jawaab toos u ahaa Sahanka Iskuulada Najaxay. Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) waxay u addeegsanayaan sidii ay u qiimeyn lahaayeen waayo-aragnimada dadka midabka ah ee laga tiro badan yahay iyo sidoo kale ardeyda LGBTQ. Wuxuu la xiriiraa qorshayaasha horumarinta iskuulka kuwaas oo Maamulayaasha dugsiyada iyo Golayaasha Dhismaha Iskuulka uu ka rabo Gobolku inay u soo gudbiyaan kormeerka. Xaalada dhabta ah ee iskuuladu waa xubinta ugu muhiimsan ee ku jirta qorshayaasha horumarinta iskuulada. Natijjooyinku waxa ay warcelin qiimo badan leh siin doonaan,Maamulayaasha, macallimiinta, shaqaalha iyo dugsiyada degmadaba.

Sahanka sanadkani yaa maamulaya ?

Dugsiyada Dadweynaha Portland waaxdooda Hawl-fulinta iyo Qorsheynta Nidaamyada aaya maamulaya Sahanka Iskuulada Najaxay ee sanad-dugsiyeedka 2016-2017 ee Waalidka/Wakiilka, Shaqaalahaa iyo Ardeyda.

Miyaan u baahanahay inaan isdiiwaangaliyo si aan u qaato Sahanka Iskuulada Najaxay?

Uma baahnid in aad isdiiwaangaliso sahanka sanadkani. Wuxuu la xiriiraa qorshayaasha horumarinta iskuulada. Wuxuu la xiriiraa qorshayaasha horumarinta iskuulada. Natijjooyinku waxa ay warcelin qiimo badan leh siin doonaan,Maamulayaasha, macallimiinta, shaqaalha iyo dugsiyada degmadaba.

Sahankani ma yahay mid la ilaaliyey(xafiday)?

Waxa aanu u isticmaalnaa sahankeyga software online ah oo ay leedahay Qualtric. Shirkadani Qualtric waa ay ilaaliyaan macluumaadka macaamiishayada iyaga oo addeegsanaya heerka ugu sareeya ee shirkadani. Sidoo kale, sahanadani online-ka ah ma isticmaaleysida magacaaga anakuna ma ururineyno macluumaad lagugu aqoonsan karo. Dhammaan warbixinaha waa laga saari doonaa wixii macluumaad ah ee lagugu aqoonsan karo, iyada oo aan kaliya la wadaagi doono iskuulada haddii ay waaldiin/wakiilo ku filani ay ka soo jawaabaan.

Waxaan ahay Waalid/Wakiil sidoo kalena kumbuyuutar aan helin karin ama ciwaan email. Sidee ayaa u qaadan karaa Sahanka Dugsiyada Najaxay?

Sahankan waxaad kaga qeybgali kartaa telefoonka gacanta, waxaad gujisaa linkiga sahanka ee pps.net . Sidoo kale waxaad booqan karaa xafiiska maamulka iskuulkaaga. Waxaa yaala nuqulo loo diyaariyey Waalidka/Wakiilkha oo ku qoran luqadaha Ingiriiska, Shiinaha, Isbaanishka, Soomaaliga, Ruushka, iyo Fiitnaamiiska.

Waxaan ku hadlaa luqad aan ka mid ahayn luqadaha la turjumo. Sidee ayaa uga qeybqaadan karaa Sahanka Xog-ururinta Dugsiyada Najaxay?

Sahanka Dugsiyada Najaxay waxaa la heli karaa iyagoo ku qoran afafka Shiinaha, Isbaanishka, Soomaaliga, Ruushka iyo Fiitnaamiiska. Si laguu caawiyo luqada aan la heli karin waxaad fadlan wacdaa Khadka Luqadaha Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) ee (503) 916-3589.

| Khadadka Luqadaha | Lambarada Telefoonada |
|-------------------------|-----------------------|
| 中文 Chinese | (503) 916-3585 |
| Español Spanish | (503) 916-3582 |
| Soomaaliga Somali | (503) 916-3586 |
| Русский Russian | (503) 916-3583 |
| Tiếng Việt Vietnamese | (503) 916-3584 |
| Luqadaha Kale | (503) 916-3589 |

MACLUUMAAD KALA SOO XIRIIR

Hirgalintii Dugsiyada Dadweynaha Portland

| | |
|--|--|
| Elise Christiansen Systems Planning and Performance | echristiansen@pps.net |
| April Arevalo Systems Planning and Performance | aarevalo@pps.net |
| Kimm Fox-Middleton Community Involvement and Public Affairs | kfoxmiddleton@pps.net |

